



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

**KU SAABSAN**

**NIDAAM SIYAASADEEDKA, QORSHAHA IYO SHARCIGA LAGU  
DHISAYO DOWLAD GOBOLLEEDYADA EE XUBINTA KA  
NOQONAYA DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**Mogadishu, 27<sup>ka</sup> Luulyo 2015**

A handwritten signature in black ink, appearing to be 'H. Hassan'.

**GOLAHA SHACABKA:**

**Markuu Arkey:** Qodobbada 48, 49, 111E ee Dastuurka sida KMG ah loo Ansixiyey;

**Markuu Arkey:** Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan Xuduudaha iyo Federaalka Lam. 75 ee 31<sup>kii</sup> Diseembar 2014;

**Markuu Arkey:** In ay lagama maarmaan tahay in la dhiso Dowlaha xubin ka noqonaya Dowladda Federaalka Soomaaliya si ay uga qeybgalaan la-tashiga Dib-u-eegista Dastuurka

**Asagoo Xog-ogaal u ah:** In Maamull Gobolleedyo KMG ah la dhisay ayagoo aan ku fadhin Sharci loo ansixiyey;


**Asaga oo ka warqaba:** In ilaa hadda aysan jirin wax nidaam siyaasadeed sharciyeysan loo dejiyey oo suurtagelinaya dhisidda Dawladaha Xubinta ka Noqonaya Dowladda Federaalka.

**Iyada oo ay naga go'an tahay:** In aanu gudano xilalka Dastuuriga ah ee saaran Golaha Shacabka Soomaaliya;

**Asaga oo ku kulansan:** Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa 23aad ee 27<sup>ka</sup> Luulyo 2015 ay goobjoog ahaayeen 140 Xildhibaan oo dhammaantood ansixiyey qaraarkan.


**Sidaa daraadeed,** Golahu wuxuu uu ugu baaqayaa Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada in ay muddo Laba Usbuuc gudahood ugu soo gudbiyaan laga bilaabo Maalinta uu qaraarkan Baarlamaankun ansixiyo.

1. Nidaam siyaasadeedka iyo qorshaha lagu dhisayo Dawladaha Xubinta ka Noqonaya Dowladda Federaalka iyo qabashada la tashiyada dadweynaha lagu dhisayo Dowlad-Gobolleedyada hadba intii suurtagal ah oo la gaarsiinkaro heer ku filan in uu sharciyad siiyo.



2. Hindise sharciyeedka lagu dhisayo Dawladaha Xubinta ka Noqonaya Federaalka iyo Hindise Sharciyeed jiritaan Sharci ah siinaya Maamul Gobolleedyada ee KMG ah taniyo inta ay ugu gudbayaan Dowladda Gobolleed xubin ka noqonaysa Dowladda Federaalka.

Hadaba waxaan idinka rajayanaynaa inaad usoo gudbisaan Golaha Shacabka si deg deg ah qorshahaas aan kor kusoo xusnay.

  
**M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"**  
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**



MJ/AM